2019

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA WASIIRADA

XEER-NIDAAMIYAHA GOLAHA WASIIRADA LR....2019

XEER-NIDAAMIYAHA GOLAHA WASIIRADA SOOMAAIYA EE LAGU DHISAYO “MACHADKA QARAN EE CAAFIMAADKA SOOMAALIYA (MQC)”

TUSMO

L#	QODOB	BOGGA
1.	Eraybixin	1
2.	Qodobka 1aad: Ujeeddada Xeer-nidaamiyahan	1
3.	Qodobka 2aad: Magaca Xeer-nidaamiyaha	1
4.	Qodobka 3aad: Qeexid	1
5.	Qodobka 4aad: Asaasidda Mac-hadka	2
6.	Qodobka 5aad: Xarunta Mac-hadka	2
7.	Qodobka 6aad: Himilada Mac-hadka	3
8.	Qodobka 7aad: Ujeedooyinka Mac-hadka	3
9.	Qodobka 8aad: Hawlaha Mac-hadka	3
10.	Qodobka 9aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Mac-hadka	4
11.	Qodobka 10aad: Qaab-dhismeedka Mac-hadka	6
12.	Qodobka 11aad: Xubnaha Golaha Maamulka	6
13.	Qodobka 12aad: Doorashada Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenka GS	6
14.	Qodobka 13aad: Xilka iyo Waajibaadka Golaha Maamulka	7
15.	Qodobka 14aad: Shuruudaha Xubinnimada Golaha Maamulka	7
16.	Qodobka 15aad: Xubinta aan u qalmin xubinnimada Golaha Maamulka	7
17.	Qodobka 16aad: Shirarka Golaha Maamulka	7
18.	Qodobka 17aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Agaasimaha Fulinta	8
19.	Qodobka 18aad: Awoodaha iyo Waajibaadka ku-xigeenka Agaasimaha Fulinta	8
20.	Qodobka 19aad: Miisaaniyadda Maal-gelinta iyo Ilaha Mac-hadka	8
21.	Qodobka 20aad: Santuuqa Gargaarka Degdegga ah ee Bulshada	9
22.	Qodobka 21aad: Buugga Xisaabaadka	9
23.	Qodobka 22aad: Warbixin-sanadeed	9
24.	Qodobka 23aad: Wareejinta Sharciyada iyo Waajibaadyada	9
25.	Qodobka 24aad: Wax-ka-beddelka	9
26.	Qodobka 25aad: Dhaqan-gal	10

ERAY-BIXIN

ERAY KOOBAN	MICNAHA
DXF:	Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka
GF:	Golaha Fulinta
GS:	Golaha Sare
JFS:	Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
KMG:	Ku Meel Gaarka ah
MQC:	Machadka Qaran ee Caafimaadka
WCDB:	Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada

F.G:
Inta aanan loosoo gudbin Xeernidaamiyahaan, xafiiska Golaha Wasiiradda Xukuumadda Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya si loo ansixiyo, waxaa lala wadaagay uuna soo maaray dhammaan hay'adaha uu khuseeyo ee Dowladda Federaalka Soomaaliya kuwaas oo dhammaantood ku biiriyay taladooda isla markaasna Wasaaraddu ku dartay wixii ay u aragtay inay lagama maarmaan u yihiin Xeerkan..

Qodobka 1aad
Ujeeddada Xeer-nidaamiyahan

1. Xeer-nidaamiyahan waa Xeer-nidaamiye heer Gole Wasiir ah, ujeeddadiisuna tahay "***Dhismaha Mac-hadka Qaran ee Caafimaadka Soomaaliya***", waxaa soo saaray Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda kaddib markay ansixiyeen Golaha Wasiirada Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS), iyagoo adeegsanaya awoodda Dastuuriga ah ee ku xusan "Qodobbada; 80aad faqradiisa (1) (a) iyo 99aad xarafkiisa (b)" ee Dastuurka Ku-meel-gaarka (KMG) ah ee JFS ee la ansaxiyay Agoosto 1, 2012.

2. Xeer-nidaamiyahan waxaa la sameeyey kaddib markii tixgalin gaar ah la siiyey baahida degdegga ah ee loo qabo dhismaha "Mac-hadka Qaran ee Caafimaadka Soomaaliya", wuxuuna u gogol-xaarayaa sameynta "Xeerka Dhismaha Mac-hadka Qaran ee Caafimaadka".

Qodobka 2aad
Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa Xeer-nidaamiyaha "**Dhismaha Machadka Qaran ee Caafimaadka**" (MQC).

Qodobka 3aad
Qeexid

Haddii aan si kale loogu micnayn Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, ereyada soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa qeexiddan ku hor qoran:

- "**Cilmi-baaris**" waxaa loola jeedaa hawlaha dawladeed ee ku salaysan adeegsi maskaxeed si loo baaro walxaha "Maatarka", loo helo, loo fasiro, looguna sameeyo habab iyo qaabab lagu horumarinayo aqoonta aadamiga, si loo xalliyo dhibaato caafimaad, loona hagaajiyo nolosha.
- "**Teknoolojiyad is-weydaarsi**" waxaa loola jeedaa habka lagu wadaagayo xirfadda, aqoonta, teknoolojiyada, muunadaha hababka wax-soo-saarka iyo agabyada kale ee laga helo warshadaha, jaamacadaha, dawladaha iyo hay'adaha kale si loo xaqiijiyo in horumarka sayniska iyo teknoolojiyaddu ay u gaaraan dad aad u fara-badan oo adeegsada, kuwaas oo iyaguna sii horumariya, kana faa'iideysta, una isticmaala sameynta wax-soo-saar cusub, habab cusub, isticmaalid cusub, qalab ama adeeg cusub.
- "**Cilmi-baarista nidaamka caafimaadka**" waxaa loola jeedaa daraasad lagu sameeyo bixinta adeeg caafimaad, gaarsiinta daawada iyo qalabka caafimaad, tababar-siinta shaqaalaha iyo kala meeleyntooda; qoondaynta miisaaniyadda iyo isticmaalkeeda; xogta caafimaad iyo qaabka loo maareeyo siyaasadda dhanka caafimaadka iyo hoggaaminta.

- "**Tijaabo-xaqiijineed**" waxaa loola jeedaa marka sheybaar tijaabo uusan qaban karin tijaabada walax ama uusan si dhammeystiran u qaban karin tijaabada walax ee uu u baahan yahay in uu u diro sheybaar kale oo kasoo xaqiijiya.
- "**Tijaabo baaritaan**" waxaa loola jeedaa marka uu sheybaar awood u yeelan waayo inuu baaro saami xanuun, cunto, biyo iyo degaan ee uu u baahdo in loo diro sheybaar kale oo kasoo xaqiijiya.
- "**Maareynta xaaladda degdegga ah ee caaafimaadka guud**" waxaa loola jeedaa habka lagu qaadayo sahan caafimaad, lagu odorosayo, lagu sii fahmayo, looga hortegayo, looguna diyaar garoobayo ka fal-celintiisa iyo kasoo kabashada khatarta caafimaadka guud, si loo dhimo halista caafimaad ee imaan karta.
- "**DXF**" waxaa loola jeedaa dawladaha xubnaha ka ah Dawladda federaalka ee ku cad **qodobka 48-aad ee (1) "A" iyo (2) ee Dastuurka KMG** ee JFS oo uu ku jiro Maamulka Gobalka Banaadir.
- "**Wasaarad**" waxaa loola jeedaa Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada (WCDB).
- **"Wasiir"** waxaa loola jeeda Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka.
- Weedh kasta oo jinsi lab looga hadlayo jinsidheddigna wuu kula jiraa.
- "**Madax-bannaan**" waxaa loola jeedaa inuu Mac-hadku u madax-bannaan yahay gudashada waajibaadkiisa, isagoo hoos taga Wasaaradda Caafimaadka.
- "**Mac-hadka**" waxaa loola jeedaa Mac-hadka Qaran ee Caafimaadka Soomaaliya (MQC).

Qodobka 4aad
Asaasidda Mac-hadka

b) Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu asaasayaa "Machadka Qaran ee Caafimaadka Soomaaliya" kaasoo ah hay'ad dawladeed oo madax-bannaan, lehna shakhsiyad qaanuuneed;

t) Machadkan wuxuu hoos tagaa Wasaaradda Caafimaadka Xukuumadda JFS.
J)- Qaab dhismeed machadka waxaa nidaaminayo qodobka 10aad ee Xeerkan.

Qodobka 5aad
Xarunta Mac-hadka

Xarunta Machadku waa magaalo-madaxda Muqdisho, wuxuuna xafiisyo iyo faracyo ku yeelan karaa meelo kale (goboladda Soomaaliya), hadba sidii loogu baahdo.

Qodobka 6aad
Himilada Mac-hadka

Himilada Mac-hadku waa "Ilaalinta, sare-uqaadidda iyo tayeynta caafimaadka bulshada iyada oo loo marayo ka hortagga cudurrada iyo khataraha caafimaadka, kobcinta adeega cafimaadka guud, sare-u-qaadidda aqoonta xirfadlayaasha Caafimaadka iyo cilmibaarista caafimaadka."

Qodobka 7aad
Ujeedooyinka Mac-hadka

Ujeedooyinka Mac-hadku leeyahay waxaa ka mid ah, kuwa soo socda:

b) Hirgelinta cilmi-baarista Caafimaadka;

t) Ka hortagga, maareynta iyo xakameynta khataraha caafimaadka guud;

j) Taabogelinta iyo tayeynta hawlaha Sheybaarka guud ee caafimaadka;

x) Tababarka, kor u qaadidda iyo tayaynta aqoonta iyo isku duwidda shaqaalaha caafimaadka

kh) Isku duwidda xogta caafimaadka;

d) Unkidda iyo ka hirgelinta qawaaninta dalka iyo kuwa caalamiga ah ee caafimaadka dalka;

r) La socodka iyo ka hortaga cudurada iyo cudurdilaacyada

s) Isku xirka iyo xiriirinta cilmibaarista, xogta caafimaadka iyo isku duwidda arrimaha caafimaadka.

Qodobka 8aad
Hawlaha Mac-hadka

Hawlaha Mac-hadku leeyahay waxaa ka mid ah, arrimaha soo socda:

b) Wuxuu sameynayaa cilmi-baaris ku saleysan hawlaha qaran ee qorshaha Cilmi-baarista Caafimaadka Guud, iyadoo loo kala hormarinayo dhibaatooyinka ka jira Caafimaadka iyo nafaqada sida ay mudnaanta u kala leeyihiin. Intaas kaddibna, wuxuu Mac-hadku abuurayaa, darsayaa oo baahinayaa aqoonta Cilmiyeed (sayniseed) iyo tan teknoolojiyadeed si loo hagaajiyo caafimaadka guud ee dadweynaha;

t) Isagoo kaashanaya hay'adaha kale oo ay khusayso, wuxuu isku duwayaa sahan lagu sii ogaanayo, laguna raad-gurayo khatarta caafimaad ee ku imaan karta dalka, wuxuu ka hortagayaa inay dhacdo xaalad caafimaad oo degdeg ah, isagoo sameynaya diyaar-garowga loo baahan yahay, ka foojignaanaya, ka digaya, waqti ku habboonna qeybinaya xogta loo baahan yahay inta lagu jiro xaaladaha caafimaad ee degdegga ah, si hufanna uga falcelinaya goorteeda, xaqiijiyana in ay si dhaqso leh uga soo kabtaan dadkii ay saameynta ku reebtay xaaladdii caafimaad ee degdegga ahayd;

j) Inuu mac-hadku xoojiyo sheybaarrada isagoo ku biirinaya shaqaale tababaran iyo teknoolojiyad casria ah si loo sameeyo cilmi-baaris xal loogu raadinayo mushkilad jirta; si fal-celin waxtar leh looga bixiyo xaaladaha caafimaad ee degdegga ah, loo fuliyo tijaabooyin xaqiijineed iyo kuwo baaritaaneed, gacanna looga gaysto tayo u yeelidda sheybaarrada sayniska cuntada iyo caafimaadka ee heer qaran si loogu suura-geliyo inay bixiyaan adeeg sheybaareed oo tayo leh;

x) Wuxuu isku duwayaa xoog shaqaale oo ka hawlgala hindise-yaasha kor loogu qaadayo dhaqaalaha caafimaadka, isagoo hirgelinaya qorshe hawleedka qaran ee shaqaaleynta iyo hore usii tababaridda shaqaalaha sida uu qabo sharciga shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed iyo siyaasadda horumarinta caafimaadka ee 2016 ilaa 2021; wuxuu isagoo kaashanaya hay'adaha kale oo ay khuseyso hirgelinayaa mashaariic waxbarid iyo khibradsiin isugu jirta oo la siinayo shaqaalaha gaarka ah ee adeegyada caafimaadka;

Kh) Wuxuu u shaqeynayaa sidii xarun isku xir iyo war is-gaarsiineed ee caafimaadka iyo xagga nafaqada ee Soomaaliya si loo tirtiro farqiga caafimaad, loona wanaajiyo natiijooyinka caafimaad ee kusoo baxaya iskaashi waara oo dhex mara hay'adda iyo bulshada.

Qodobka 9aad
Awoodaha iyo Waajibaadka Mac-hadka

b) Wuxuu diyaarinayaa hawlaha cilmi-baarista Qaran ee Caafimaadka Guud iyo nafaqada, iskuna dubbaridayaa cilmi-baarista qodobbadii laysla gartay, soona gudbinayaa warbixin xirfadeed ku salaysan natiijadii la helay, wuxuu qeybinayaa natiijadii cilmi-baarista kasoo baxday, isagoo qiimaynaya saameyntooda;

t) Wuxuu jaan-goynayaa isku xirnaanta iyo wax ku oolnnimada cilmi-baarista laga sameynayo dalka oo dhan, wuxuu sameynayaa xarunta cilmi-baarista dalku kusoo ururto (database); wuxuuna taageero farsamo siinayaa gobollada iyo hay'adaha kale ee cilmi-baarista ku hawlan;

j) Wuxuu bixinayaa kaalmo cilmiyeysan oo looga hortagayo dhibaatooyinka waaweyn ee haysta caafimaadka guud, isagoo adeegsanaya nidaamka teknoolojiyad isweydaarsiga. Meelaha uu caawimada ka gaysanayo waxaa ka mid ah soo-saaridda ballaaran ee tallaalka, qalabka wax lagu baaro, cilmiga cuntada iyo nafaqada leh, iyo waxyaabaha kale ee waxtarka u leh adeegga caafimaadka;

x) Wuxuu sameynayaa Cilmi-baarista Caafimaadka ee lagama maarmaanka u ah kor-u-qaadista caafimaadka iyo ka hortagga cudurrada, wuxuuna qiimeynayaa waxtarka ay yeesheen adeegyadii ay bixiyeen bahda caafimaadku;

k) Wuxuu Cilmi-baaris Caafimaad ku sameynayaa degaanka iyo khataraha caafimaad ee ka jira goobaha shaqada;

d- Wuxuu sahan qaran ku sameynayaa cudurrada faafa, nafaqada, caafimaadka degaanka, Cilmi-baarista nidaamka caafimaadka iyo wixii kale ee la xiriira;

r) Wuxuu sameynayaa cilmi-baaris, isagoo ururinaya iskuna duwaya xogta habka looga hortegi karo cudurrada ka dhasha nafaqo darrada iyo nafaqo yarida iyo sidoo kale habka loo hagaajin karo xaaladda nafaqo ee heer qoys;

s) Wuxuu cilmi-baaris ku sameynayaa daawa dhaqameedka iyo farsama dhaqameedka caafimaad iyo daawooyinka casriga ah, wuxuu darsayaa hababka loosoo saaro daawa dhaqameedka la xaqiijiyay waxtarkooda caafimaad iyo bedqabkooda, wuxuu xaqiijinayaa in lagu daro dawooyinka lagu isticmaalo habka adeegga Caafimaad ee jira, wuxuu hay'adaha ay khuseyso kala shaqeeyaa dhawridda iyo badbaadinta dhirta laga helo daawa dhaqameedka iyo hababka kale is daaweynta soo-jireenka ah si aysan u dabar go'in;

sh) Wuxuu tilmaamo iyo buugaag talo-bixin ah ka qorayaa dhammaan qeybaha caafimaadka guud, anshaxa iyo dhaqan wanaagga cilmi-baarista oo ay ka mid tahay qanacsanaanta, bedqabka iyo diiwaan-gelinta dadkaas cilmi-baarista sameynaya;

dh) Wuxuu si wadajir ah cilmbaaris ula sameynayaa hay'adaha ay khusayso ee gudaha iyo kuwa caalamkaba, wuxuuna hay'ado kale ku gacansiinayaa in ay cilmibaaris sameeyaan hadba markii loo baahdo;

c) Wuxuu bixinayaa tababarro waqtigoodu gaaban yahay iyo kuwa waqti dheer yahay oo ku xiran baahida taagan sida cilmi-baarista caafimaadka guud, maareynta xaaladaha caafimaad ee degdegga ah iyo tayada nidaamka shaybaarrada;

g) Wuxuu isku dubbaridayaa darseynta waqtiga ku habboon ee la qeybinayo xogta ku saabsan khataraha gaarka ah ee la xiriira caafimaadka guud, cudurrada sida dhaqsiyaha leh u faafa iyo dhibaatooyinka degaameed iyo kuwa nafaqo;

f) Wuxuu naqshadeynayaa istaraatiijiyadda isagoo dajinayaa hab-raaca, diyaarinta qorshaha diyaar-garowga iyo ka fal-celinta, wuxuuna dhisayaa shaqada iyo qaab-dhismeedka isku xirnaanta iyo nidaamka laysaga kaashanayo xaaladda caafimaadka ee degdegga ah iyo taageero siinta gobollada iyo dawlad-goboleedyada si loo hubiyo in shaqo mid ah ay qabanayaan heerarka oo dhammi, wuxuu isku duwayaa qiimeynta nuglaanta caafimaadka guud iyo daraaseyn khataraha ee heer qaran;

q) Wuxuu qaadayaa baaritaan degdeg ah markii loo bahdo, gaar ahaan markii uu cudur dilaaco, ayna jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah ama la arko khatar caafimaadka guud la xiriirta, wuxuu xaqiijinayaa inuu cudur dillaacay, isagoo sheegayaa halista, uguna digayaa dadka, markii loo

baahdana xogta u gudbinaya hay'adaha ay khusayso. Wuxuu abaabulayaa kana qeybqaadanayaa isticmaalka hantida loo helikaro ka fal-celinta xaaladaha degdegga ah, wuxuu taageerayaa markii loo baahdo hawlaha gurmadka ah ee ka socda heer dawlad-goboleed ilaa heer gobol;

k) Asagoo kaashanaya hay'adaha ay khusayso, wuxuu qiimeynayaa khasaaraha ka dhashay musiibooyinka dabiiciga ah ama kuwa aadanuhu sababo, wuxuuna gacan ka geysanayaa dadaalada looga soo kabanayo;

l) Wuxuu hirgelinayaa qodobbada aasaasiga ah ee xeerarka caafimaad ee caalamiga ah ee la'isla qaatay 2005, markii ay jirto xaalad ba'an oo cudurro ah iyo xaalad caafimaad oo degdeg ah, kuwaas oo yeelan kara saameyn caalami ah;

m) Wuxuu sameeyaa tijaabooyin xaqiijineed iyo kuwa baaritaaneed ee sheybaarada;

n) Wuxuu ka caawinayaa sheybaarrada waddanka in ay yeeshaan tayo heer qaran iyo heer caalamiba ah, isagoo siinaya tababarro qoto-dheer oo tayadhis ah, sidoo kalena sameynaya siyaasad qaran oo sheybaareed, barnaamijyo iyo hirgelinta tilmaamo habraacyo ah;

w) Lacag ayuu ku dallicikaraa adeegyada la talinta, tijaabooyinka xaqiijineed iyo kuwa baaritaaneed ee sheybaarada;

h) Wuxuu yeelan karaa hanti, geli karaa heshiis, wuu dacwoon karaa, lana dacweyn karaa isagoo wata magaciisa qaanuuniga ah; iyo

i) Wuxuu yeelan karaa ama gudan karaa hawlo iyo waajibaadkale hadba sidii loogu igmado.

Qodobka 10aad
Qaab-dhismeedka Mac-hadka

Machadku wuxuu yeelanayaa: -

~~**b)**~~ Maamul (Board of directors) oo ka immaanayo Hay'adaha Wasaaradda Waaxyaheeda ay khusayso ;

t) Agaasime fulineed iyo ku-xigeen agaasime fulineed oo uu soo magacaabo Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka); iyo waaxyo kala duwan oo lagu salaynayo hadba baahida shaqo ee Machadka.

j) Shaqaale hadba intii loo baahdo ah ayadoo la eegayo baahida shaqo ee Machadka.

Qodobka 11aad
Xubnaha Golaha Sare

b) Xubnaha Golaha Maamulka waxaan soo xulayo Wasiirka, waxaana lagu magacaabayaa Xeer Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka;

t) Tirada xubnaha Golaha Maamulka waxaa go'aaminaya Wasiirka, waxayna ku xirin tahay hadba baahida jirta.

j) Golaha Maamulka waxay xilka haynayaan muddo 4 (afar) sano ah.

x)- Golaha Maamulku waxay xilka ku waaykaraan ka sokoow geeri iyo iscasilaad, sida ay ku yimaadeen.

Qodobka 12aad
Doorashada Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenka GS

Marka uu Wasiirka Wasaaradda Caafimaadku magacaabo Xubnaha Golaha Sare, iyaga ayaa si madax-bannaan iska dhex-dooranaya Gudoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka GS, waxaana markaas kaddib Dikreeto ku soo saaraya Wasiirka.

Qodobka 13aad
Xilka iyo Waajibaadka Golaha Maamulka

Golaha Maamulku wuxuu:

b) Machadka kala talinayaa arrimaha khuseeya siyaasaddaha Caafimaadka iyo istaraatiijiyadaha;

t) Dhisaa markii loo baahdo guddiyo farsamo oo kala duwan; iyo

j) Sameynayaa nidaam iyo xeerar u gaar ah kaddib markuu kala tashto Wasiir.

x) Waxaa uu ansixiyaa miisaaniyadda, Qorsha-howleedka iyo baahida shaqaale ee Machadka kaddib marka uu soo gudbiyo Aggaasimuhu.

Qodobka 14aad
Shuruudaha Xubinnimada Golaha Maamulka

1. Shuruudaha looga baahan yahay xubnaha ka mid noqonayo Golaha waa:

b) In ay xubintu tahay Soomaali;

t) In xubintu dhaqan-wanaaag ku tilmaaman tahay, sumcad fiicanna ay ku leedahay bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda;

j) In xubintu ay haysato shahaadooyin caafimaad ama tacliin u dhiganta ama ugu yaraan shahaadada derejada kowaad iyo khibrad Shan sano ah; iyo

x) In xubintu aan horey loogu xukumin dembi ka badan saddex sano oo xarig ah ama aysan u eedeysaneyn maxkamad sharci ah dalka ama dibaddaba.

2. Shuruudahan ku xusan Faqrada (1) (b, t, j & x) ee Qodobkan, waxaa sidoo kale lagu xulayaa Agaasimaha Fulinta Mac-hadka iyo Agaasime Ku-xigeenka Mac-hadka.

Qodobka 15aad
Xubinta aan u qalmin xubinnimada Golaha

Qof kasta oo ku tilmaaman arrimahan soo socda uma qalmo in uu xubin ka noqdo GS ee MQC:

b) Qof lagu xukumay in uu dembi Ciqaabeed ama maamul ee uu galay ama anshax xumo lagu yaqaan;

t) Qof maskax ahaan aan fiyoobeyn; iyo
j) Qof dano dhaqaale ka leh, danahaas oo ka hor imaanaya danaha loo aasaasay MQC.

Qodobka 16aad
Shirarka Golaha

Goluhu waxaa uu yeelankaraa kulan cadi ah iyo mid aan caadi ahayn, waxaana isugu yeerikara Guddoomiyaha, waxa uuna ku immaanayaa sida soo socoto:

b) Kalfadhiga Golaha wuxuu furmi karaa marka ay soo xaadiraan in ka badan kala bar (50% + 1) wadarta guud ee xubnaha Golaha;
t) Go'aan kasta waa in lagu ansixiyaa cod aqlabiyad hal dheeri ah, tirada guud ee Golaha, hase yeeshee, haddii codadku isla'ekaadaan, guddoomiyuhu wuu codaynayaa si uu dhinac u rajaxo; iyo
j) Shirarka waxaa la qabanayaa sannadkiiba labo mar, laakiin guddoomiyaha ama 2/3 (saddex meelood labo meel) ee xubnuha guud ee GM ayaa isugu yeeri kara kulan degdeg ah, haddi loo baahdo.

Qodobka 17aad
Awoodaha iyo Waajibaadka Aggaasimaha Fulinta

1- Agaasimaha Fulintu waa sarkaalka madaxa fulinta ee Mac-hadka, waana agaasimaha maamulka hawlaha Mac-hadka;
2- Iyadoo aan wax loo dhibeyn guud ahaan waaajibaadka Golaha waxaa ka mid ah masuuliyaddiisa arrimaha soo socdo:

b)- Gudanayaa awoodaha iyo waajibaadyada maamul ee ku xusan Qodobka 9aad ee Xeerkan:

t)- Diyaarinayaa nidaamka lacag bixinta ee aqoonta ku salaysan iyo xirfadleyaasha kale si gooni-gooni ah, kuwaas oo ku hawlan mashaariicda iskaashiga caalamiga ah ee ku salaysan nidaamka maaliyadeed ee ku jira hab-maamuuskan, asagoo u soo gudbinayaa wasaaradda kaddib markuu ka ansixiyo Golaha;

i. Diyaarinayaa qorsheyaasha sanadlaha ah iyo miisaaniyadda Mac-hadka, wuxuuna u soo gudbinayaa Wasaaradda, kaddib markuu ka ansixiyo Golaha;
ii. U matalaa Machadka dhammaan wada-xaajoodyada lala yeelanayo dhinacyada kale;
iii. Diyaarinayaa wabixinta waxqabadka iyo warbixinnada maaliyadeed ee mac-hadka, wuxuuna u soo gudbinayaa Wasaaradda kaddib markuu soo mariyo Golaha; iyo

j) Agaasimaha Fulintu wuxuu awood u siin karaa fulinta qaar ka mid ah awoodaha iyo waajibaadka uu leeyahay shaqaalaha Mac-hadka ilaa inta ay lagama maarmaanka u tahay waxqabadka firfircoon ee Machadka.

Qodobka 18aad
Awoodaha iyo Waajibaadka ku-xigeenka Agaasimaha Fulinta

b) Ku-xigeenka Agaasimaha Fulinta wuxuu:

i. Ka caawinayaa Agaasimaha Fulinta dhanka qorsheynta, abaabulka, hagista iyo isku duwidda hawlaha Machadka;

ii. Sameynta hawlo kale oo gaar ah oo uu u xilsaaraan yahay Agaasimaha Fulinta; iyo

t) Ku-xigeenka Agaasimaha Fulinta, wuxuu si gaar ah ugu xilsaaran yahay in uu matalo Agaasimaha Fulinta marka uu maqan yahay.

Qodobka 19aad
Miisaaniyadda Maal-gelinta iyo Ilaha Mac-hadka

Miisaaniyada Mac-hadka waxay ka mid tahay:

b) Qoondada Miisaaniyadda guud ee Xukuumadda JFS, gaar ahaan qeybta Wasaaradda Caafimaadka;

t) Lacagaha laga helo ururada deeqaha bixiya ee sida gaarka ah Mac-hadku u helo; iyo

j) Lacagta laga helo ilaha kale ee suuro-galka ah.

Qodobka 20aad
Santuuqa Gargaarka Degdegga ah ee Bulshada

Mac-hadku wuxuu soo gudbinayaa si loo ansixiyo Miisaaniyad loo isticmaalo ka jawaabidda baahida degdegga ah ee adeegga bulshada, joogtaynta iyo ilaalinta bukaannada iyo maamulidda daawooyinka iyo qalabka Caafimaadka.

Qodobka 21aad
Buugga Xisaabaadka

b) Mac-hadku wuxuu lahaanayaa oo keydinayaa buugaag-xisaabeed dhammaystiran oo sax ah waafaqsanna Sharciga maamulkaa maaliyadda Dalka;

t) Buugaagta xisaabaadka iyo dukumentiyada kale ee maaliyadeed ee mac-hadka sanadkiiba mar ayaa la xisaabinkaraa, waxaanna xisaabinaya Hanti-dhawrka Guud ama Xisaabiye uu u xilsaaray.

Qodobka 22aad
Warbixin-sanadeed

Dhammaadka sannad kasta gaar ahaan (3) bilood ee ugu dambeysa sanadka, Aggaasimaha Mac-hadku wuxuu soo gudbinayaa warbixin-sanadeedka shaqada Mac-hadka Qaran ee Caafimaadka, wuxuuna u soo gudbinayaa Wasaaradda Caafimaadka kaddib markuu ka soo ansixiyo Golaha Maamulka.

Qodobka 23aad
Wareejinta Sharciyada iyo Waajibaadyada

Sharciyada iyo Waajibaadyada Mac-hadka Qaran ee Caafimaadka Soomaaliya, marka la dhammaystiro dhismahiisa Wasiirka caafimaadka iyo daryeelka Bulshada ayaa si rasmi ah ugu wareejinayo howshooda kaddib marka la meelmariyo Xeerkan.

Qodobka 24aad
Wax-ka-beddelka

b) Xeer-nidaamiyahan waxaa wax-ka-beddelaya aqlabiyadda Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS;

t) Ogeysiiis qoraal ah oo ku saabsan wax-ka-beddelka Xeer-nidamiyahan waxaa la gaarsiiyaa xubnaha GM ee Mac-hadka labo toddobaad gudahood.

Qodobka 25aad:
Dhaqan-gal

Xeer-nidaamiyahan wuxuu dhaqan-galayaa marka ay ansixiyaan Golaha Wasiirrada Xukuumadda JFS, isla markaasna saxiixo Ra'iisulwasaaraha Xukuumadda JFS, waxaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.